

Chemical Emergencies

A chemical emergency occurs when toxic chemicals are released into the air, put in food or released in water during an accident or attack. The chemicals may be gases, liquids or solids. The chemicals may be harmful to people and the environment. Chemicals may harm people if they are breathed in, absorbed through the skin or swallowed.

Watch for signs of a chemical emergency such as:

- Watery eyes
- Shortness of breath or choking
- Problems with movement or walking
- Confused thoughts
- Twitching movements
- Burning skin

An increase in sick or dead birds, fish or small animals may be another sign of a chemical emergency.

During a Chemical Emergency

Listen for reports on the television, radio or Internet.

- Local or state officials will let you know what signs to look for.
- Officials will tell you whether to stay inside or leave your home.
- If you are told to stay inside:
 - Turn off all furnaces, air conditioners and fans.
 - Close vents.
 - Close and lock all doors and windows.

If you feel sick, call your doctor right away or go to the hospital.

Kedis Kiimiko

Kedis Kiimiko waxa uu dhacaa marka kiimikooyin sun ah lagu sii daayo hawada, lagu daro cuntada ama lagu sii daayo biyaha marka uu dhaco shil ama weerar. Waxa laga yaabaa in kiimikooyinku yihiin nooc ah neef, hoore ama adke. Waxa laga yaabaa in kiimikooyinku ay waxyeelayn karaan dadka iyo deegaanka. Waxa laga yaabaa in kiimikooyinku ay waxyeelayn karaan dadka haddii la neefsado, ay ka gudbaan maqaarka ama la liqo.

La soco calaamadaha kedis kiimiko sida:

- Indho biyo leh
- Neefsashada oo dhib ah ama neefta oo ku haysa
- Dhibaatooyin ah dhaqaaqa ama socodka
- Fikirka oo qasan
- Dhaqdhaqaaqyo dubaaxin ah
- Maqaar gubasho leh

Korodh ah shimbiro, kaluun ama xayawaan yaryar oo jiran ama dhintay ayaa laga yaabaa in uu yahay calaamad kale oo lagu garan karo kedis kiimiko.

Inta Lagu Jiro Kedis Kiimiko

Warbixinno ka dhegayso telefishanka, raadyowga ama internetka.

- Saraakiisha degmada ama gobolka ayaa kuu sheegi doona calaamadaha la rabo in aad la socotid.
- Saraakiisha ayaa kuu sheegi doona in aad joogtid gudaha ama aad ka baxdid gurigaaga.
- Haddii lagu sheego in aad joogtid gudaha:
 - Bakhtii dhamaan shooladaha, kuleyliyeyaasha, hawo-qaboojiyeyaasha iyo marawaxadaha.
 - Xidh meelaha hawadu ka soo gasho.
 - Xidh oo handaraab dhamaan albaabada iyo daaqadaha.

Haddii aad dareentid jiro, isla markiiba wac dhakhtarkaaga ama tag cisbitaalka.

If you see a chemical release:

- Leave the area right away.
- Cover your nose and mouth with fabric to filter the air but still allow breathing.
- Find shelter.
 - If the chemical is in a building, leave the building without passing through the chemical. If you cannot leave the building, move as far away as you can from the chemical.
 - If you are outside, find the fastest way to get away from the chemical. If you can tell which way the wind is blowing, move in the opposite direction or upwind. If you cannot stay upwind or get away from the chemical, go inside a building.
- Call the police if they are not aware of the chemical emergency.

If you have gotten some chemical on you or you think you may have gotten some chemical on you:

- Take off your clothes and put them in a plastic bag. Seal the bag tightly.
- Take a shower or wash your skin and hair well with soap and water. Do not scrub the chemical into your skin. If outside, look for a hose or any source of water.
- Put on clean clothes.
- Seek medical care if you have signs of a chemical emergency.

If certain chemicals get on people, officials may have them go through **decontamination**. This involves removing clothes and showering to wash the chemicals from the skin. This may be done in a portable shower unit.

Haddii aad aragtid sii-dayn kiimiko:

- Isla markiiba ka tag aagga.
- Afkaaga iyo sanku ku dabool maro si ay hawada u safeeyso isla markaana ay suurogal u noqoto in aad neefsatid.
- Raadso gabood.
 - Haddii kiimikadu ku dhex jirto dhisme, ka bax dhismaha adiga oo aan sii dhex marin kiimikada. Haddii aanad ka bixi karin dhismaha, ka fogow kiimikada intii suurogal ah.
 - Haddii aad joogtid dibadda, hel jidka ugu dhakhsaha badan ee aad kaga fogaan kartid kiimikada. Haddii aad garan kartid dhinaca ay dabayshu ka imanayso, u dhaqaaq dhinaca ka soo horjeeda ama dhinaca ay ka imanayso. Haddii aanad dhinaca dabaysho ka imanayso joogi karin ama ama aanad ka baxsan karin kiimikada, gal gudaha dhisme.
- Wac boliiska haddii aanay ka warqabin kediska kiimikada.

Haddii in kiimiko ahi ku saaran tahay ama aad u maleynaysid inay ku soo gaadhay kiimiko:

- Iska saar dharka oo ku rid bac ama boorso balaastig ah. Bacda ama boorsada si adag u xidh.
- Maydho ama qubayso ama maqaarkaaga iyo timaha ku maydh biyo iyo saabuun. Kiimikada ha ku sii xoqin maqaarkaaga. Haddii aad dibadda joogtid, raadi tuubo biyo ama il biyo oo kasta.
- Gasho dhar nadiif ah.
- Raadso daryeel caafimaad haddii aad leedahay calaamadaha kedis kiimiko.

Haddii kiimikooyinka qaarkood soo gaadhaan dadka, waxa laga yaabaa in saraakiishu ay ku dhaqaaqaan **sun-saaris**. Taa waxa ku jira dharka oo la saaro iyo maydhis ama qubeys si kiimikooyin looga dhaqo maqaarka. Waxa laga yaabaa in taa lagu sameeyo qalab maydhis oo ah nooca la qaado.

1/2007. Content developed through a partnership of the Central Ohio Trauma System, the Columbus Medical Association Foundation, Columbus Public Health, Franklin County Board of Health, Mount Carmel Health, Ohio State University Medical Center and OhioHealth, Columbus, Ohio. Available for use as a public service without copyright restrictions at www.healthinfotranslations.com.

Chemical Emergencies Somali.